

Geeraar: Calan Yahow Rag U Hoobtay! W/T: Ibrahim Nolosha



Geeraar: Calan Yahow Rag U Hoobtay! Geeraarrkan ?Calan yahow Rag U Hoobtay? waxa aan curiyey bishii Juun 26-keedii, sanadkii 2016. Maalmaha xorriyadda ayaa aan ugu talagalay in aan uga qeybgalo kuna muujiyo dareenkeyga ku aaddan marxaladihii uu soo maray calanankeygu iyo haddeer sida uu yahay. Geeraarku waxa uu ku billaabmayaa sida tan:- **Hiimammow dadku jiifo Anigoo hurdi waayeyHadba gees u gaddoomaMaxaan heeso ku raagayMaskaxdeyda ka hoorshayDhan walbaan ka hagaajay Bal maxaan halladaadoIyo huurka ka dhowrayoo habeenkan la joogoSida loox u higgadshayCalanyahow rag u hoobtay Holganaantu ku taalloMuxuu Dhows ku HagraayaHamboraaca daneeystaHeybaddaada ka doortayGunno heyr lala tuuray Calanyahow rag u hoobtayDad kalaan ku hureyneMuxuu geesi halyeeyaHanfigeeda adduunyoHarsi kaaga dhax waabayOo halaadi ku faanayHeybtiyo magacaagaCalanyahow rag u hoobtayImisaa ku haruuftayMidabkaaga halaagtayMuunaddaada halleysayHurdi gaalo walaaqdayHurre riinji la moodoKugu jiidday HawaarroCalanyahow rag u hoobtayKolkad heegada fuushoHawadaa la ciyaartoSida hooyo la ciilayUbadkii laga haystoAma wiil ka habaabayHiqhiqlaynta ma daayoMidka jooga hareertaHiilladaada u taaganHadya jeer ku ilaalshaCalanyahow rag u hoobtayHiiradii lagu taagayMarkey howshu timaadoSida hooballo caanaHiddeheenna ciyaaraImisaa hirwo booddayHooyaalada gabaygaIyagoon haghagleyninHadyad kuugu luqeeyayHalgankii wadankeennaInnagoonan halmaaminHorintii na xoreeysayWaqdhis baan u hibeyneHalla soo hambariiroInta aysan harraadinHalhaleel ku aroorshaHashu yeynan sannaarinHoobaaleeyda geeraarkaHaro aan ka dhuraayeyDucu aan ku harqaamoQarni haaday mid joogaCalankaan hergeleynayMilgahaan huwaneynayRabboow hoog ka ilaaliHoobaaleyda geeraarkaHaro aan ka dhuraayeyHabaar aan ku idleeyoKuwa soo hardamaayaHadba gees ka rifaaya Rabbiyoow qaw holceysaAma naar ku hagaaji. [W/T: Ibrahim Nolosha](#)]**